

Mudane/marwo,

Waxaad magangelyo ka weydiisatay Nederland. Dowladda Nederland waxey go'aamisay in IND muddo dheeraad ah la siinaayo si ay uga go'aamiyaan codsiyada magangelyada. Warqaddan ayaad ka aqrisaneysaa waxa arrintan codsigaaga ka saameyn doona.

Caadi ahaan IND waxay heysataa 6 bilood si ay uga so jawaabaan codsigaaga magangelyodoonka

Mudadaasi go'aanka waxa la dhahaa waqtiga sharciyeysan ee go'aaminta. Sida uu qabo sharciga mudada sharciyeysan ee codsiga magangelyodoonka waa 6 bilood guud ahaan.

Waxaa IND ku dheereyneysaa dhamaan go'aanada codsiyada magangelyodoonka 9 bilood

Tirada codsiyada magangelyodoonka wuu ka koreeyaa inta ay IND ka shaqeyn karto. Inkastoo tallaabooyin badan ayaa la qaaday uma suura gelin IND iney 6 bilood wax ku go'aamiyaan. Waxaan fileynaa in mudada soo socda inaan muddo dheer u baahannahay si aan go'aan u gaarno. Sidaa awgeed ayaa dowladda qoraal loo qoray baarlamaanka 26 agoosto 2022 la go'aamiyey in mudada go'aanka la dheereeyo.

Go'aankaaga waxaa suura gal ah in sababo kale uu u sii dheeraaday

Mar mar IND ayaa mudada go'aankaaga mar hore ay sii dheereysey. Halkan hoose ayaa ka aqrisaneysaa tusaalooyin xaalado ay mudada go'aanka dheeraatay:

- Codsigaaga wuxuu ku jiraa go'aanada dib u dhigida. Taasi waxey micnaheeda tahay in IND ilaa muddo aysan go'aan ka gaareynin codsiyada magangelyodoon ee waddan gaar ah. Waxaa IND taasi sameyneysaa haddii xaalada waddankaaga uusan waadix ahayn. Markaa mudada go'aaminta badiyaa 1 sanno ayey sii dheeraaneyso.
- Waxa IND dacwadaada markii hore uga shaqeysey dacwad Dublin ah. Taasi waxey dhacdaa marka aan u maleyno in waddan kale oo EU ah uu mas'uul ka yahay codsigaaga magangelyodoonka. Tusaale adigoo magangelyo ka weydiistay waddan kale oo EU ah. Waxaad heshay warqad in Nederland hase yeeshee ay dacwadaada magangelyodoonka ay ka shaqeynayaan.
- Waxaa IND ay codsigaaga magangelyodoonka ka gaareen go'aan diidmo. Adiga waxaad ka dacwootay xaakinka. Xaakinka wuxuu go'aamiyey in IND ay go'aan kale ka soo gaaraan codsigaaga magangelyodoonka.
- Waxa IND u baahan yihiin muddo dheer oo baaritaan ah. Fariin arrintan ah ayaa hore u heshay.

Mudada sharciyeysan ee go'aaminta codsigaaga magangelyodoonka wuxuu ugu badnaan noqonayaa 21 bilood

Adiga ayaa xisaabin kara mudada go'aankaaga. Waxaad xisaabineysaa 6+9+ laga yaabo in hore la sii dheereeyey isku darki waa ugu badnaan 21 bilood. IND looma oggola marna iney 21 bilood ka badan ay go'aan ku qaadato.

Waxaad ka bilaabeysaa mudada aad saxiixday codsiga magangelyodoonka. Mar hore ayaa IND uga shaqeysey codsigaaga dacwad Dublin ahaan? Markaa waxaad ka xisaabineysaa waqtiga ay IND ay ku ogeysiisey in dacwadaada lagu daray dacwada waddanka. Taasi waa waqtiga ay IND ku ogeysiisey in Nederland ay mas'uul ka tahay codsigaaga magangelyodoonka.

Waxaan ku dadaaleynaa inaan sida ugu dhaqsaha badan aan bayaan kaa siino mustaqbalkaaga

Waan fahmeynaa inaad rabto inaad ogaato sida xaaladaada noqoneyso. Iney tani kugu noqon karto farriin aad kuugu adag. Nasiib daro kuuma sheegi karno waqtiga tooska ah ee aad go'aanka heli doonto. Waxaa IND qaadayaan tallaabooyin kala duwan iney codsiyada si dhaqso ah uga jawaabaan. IND wey kula soo xariirayaan haddii codsigaaga tani ay quseyso.

Warbixin dheeraad?

Waxaan dhamaan horumarka ku saabsan dacwadaha magangelyodoonka iyo tallaabooyinka ku qoreynaa websaaytkeena. Warbixin dheeraad iyo wararka ugu dambeeyey ka fiiri ind.nl/actueel-asiel.

Mahadsanid,

Wasiirul dowlaha Amniga iyo Cadaaladda,

Ku hadlaaya magaca,

C. Nijkamp

Agaasimaha magangelyada iyo Badbaadada.